



# Jamhuuriyada Somaliland

## Golaha Wakiilada JSL



## Warbixinta

# Wax-qabadkii Golaha Wakiilada Sanadkii 2011-ka

**Contact:-**

Somaliland House of Representatives Building

Mobile:- +252-634425218 and +252-634424837

[golaha@somalilandparliament.net](mailto:golaha@somalilandparliament.net)

Visit the House Website [www.Somalilandparliament.net](http://www.Somalilandparliament.net) or [www.Somalilandparliament.com](http://www.Somalilandparliament.com)

# Warbixinta Sanadkii 2011-kii ee

## Wax qabadka Golaha Wakiilada

Halkan waxaan idiinku soo gudbinaynaa wax qabadii sanadka 2011ka ee Golaha Wakiilada intii u dhaxasay 29/01/2011-27/11/2011 mudadaa waxaa golaha wakiilada u qabsoomay (3) saddex kala fadhi oo kala ahaa Kal-fadhiyadii 14, 15,16aad oo ay fadhiistay 103 fadhi, iyadoo Gudiyaduna fadhiisteen 46 fadhi, marka laga reebo Gudida joogtada oo shaqeyaya intuu Goluhu fasax ku maqan yahay waxayna fadhiisatay 63 fadhi.

Goluhu wuxuu gaadhay sanadkaas **47** go'aan oo ka mid ahaayeen **13** Go'aan Ansixin Xeerar, **23** Go'aan Ansixin Masuuliyiin Qaran, Sidoo kale wuxuu Xogwareysi la yeesheen Musuuliyiin Qaran oo kala duwan oo Golaha iyo Gudiyada Golahaba u yimi.

### 1. Kal-fadhiyadii Goluhu fadhiistey:-

1	Kal-fadhigii 14 <sup>aad</sup>	29/01/29 ilaa 10/04/2011
2	Kal-fadhigii 15 <sup>aad</sup>	14/06/2011 ilaa 30/07/2011
3	Kal-fadhiga 16 <sup>aad</sup>	17/09/2011 ilaa 17/11/2011

### 2. Khudbad sanadeedkii Madaxweynaha JSL:-



Khudbad sanadeedkii Madaxweynaha ee Barlamaanka oo ah mid dastuuriya, ayuu madaxweynaha JSL Mudane Axmed Maxamed Siilaanyo 18/06/2011 u jeediyay Fadhi wada-jir ahaa oo ka dhacey aqalka Golaha Odayaasha ee Guurtida Somaliland, isagoo madaxweynuhu khudbadiisa kaga hadley waxyaabo badan oo ay ka mid yihiin duruufihii uu ka dhaxlay Xukuumadii ka horaysay, Waxqabadka Xukuumadda Cusub, xaaladihii Mandaqada ka taagnaa wakhtigaa, Qorshe Sannadeedkii Xukuumadiisa, Dhaqaalaha, Arrimaha Bulshada, Dawlad Wanaaga, Wacyigelinta iyo Isgaadhsiinta iyo sidoo kale Nabadgelyada, Arrimaha Dibedda Arrimaha Siyaasadda Gudaha wuxuuna ugu danbeyntii Madaxweynuhu labada Gole ka codsadey inay de-dejiyaan Xeerar horyaaley oo Xukuumadu u soo gudbisey.

Wuxuu ku soo gabagabeeyay in lawada garaw sanyahay rajada faraha badan ee xukuumadiisa laga filayo, wuxuuna yidhi oo ku soo gabagabeeyay isbadalka loo baahan yahay in aanu ku iman Karin lix bilood iyo sanadna sidaa darted Ninna korkiisa biyo Kama dhawree lagu kalsoonaado in aanu waxba ka hargan doonin dalkiisa iyo dadkiisa, idina noogu ducaysaan in rabi noo fududeeyo hawshaa baaxada leh AMIIIN.

### **3. FADHIYADII WADAJIRKA AHAA EE LABADA GOLE (WAKIILADA IYO GUURTIDA):-**

Labada Gole intii lagu jiray sanadkii 2011ka waxay fadhi wada jir ah yeesheen tiroba (5) Shan jeer kuwaas oo kala ah:-

- 1. Fadhiigii Khudbad sanadeedka Madaxweynaha ee Laba Aqal ee Baarlamaanka Somaliland oo ay mudanayaashu ku dhagaysteen khudbadii sanadka ee Madaxweynaha.**



2. Fadhiigii Mudanayaasha Labada Gole ku Ansixiyeen Ogolaanshihii Xilka qaadista Gudoomiyaha Maxkamada Sare **Md. Maxamed Xirsi Omane** oo ay fadhigaa Xilka kaga qaadeen taariikhdu markay ahayd **21/06/2011**.
3. Sidoo kale waxay Mudanayaasha Labada Gole fadhi wada jir ah ku ansixiyeen Gudoomiha Cusub ee Maxkamada Sare **Md. Yuusuf Ismaciil Cali** oo Madaxweynuhu u magacaabay xilkaa ka dibna uu usoo gudbiyay Golayaasha Barlamaanka Somaliland si ugu ogolaadaan xilka loo magacaabay.
4. Mudanyaasha labada Gole ee Guurtida iyo Wakiiladu waxay fadhi wada jir ah yeesheen kulan uu booqasho safar dalka ku yimi wafti ka socda midowga yurub iyo wadamada deeq bixiyayaasha ka kooban oo uu gudoominayay Agaasime **ANDRIS PIEBALGS** oo war bixin nuxur keedu taabanayay dhinacyo badan ka jeediyay, waxaana kamid ahaa wax yaabaha uu sida qotoda dheer uga hadlay, Arimaha qarameedka iyo goboleedka, arimaha maamulka, iyo tusaalooyin xagga Dhaqaalaha.
5. Mudanyaasha labada Gole ee Guurtida iyo Wakiiladu waxay fadhi wada jir ah ku dhagaysteen Wasiirka Arrimaha Afrika u qaabilsan Dawlada Britain oo booqasho gaaban Dalka ku yimi.

## 6. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka:-

### A. **Masuuliyiin Golaha Wasiirada**

No.	Masuulka	Xilka Masuulka
1.	Md. Axmed Cabdi Xaabasade	Wasiirka Warfaafinta iyo Wacyigalinta
2.	Md. Maxamed Siciid Gacamay	Wasiirka Deegaanka iyo H/Reer miyiga
3.	Md. Xirsi Cali X.Xasan	Wasiirka Madaxtooyada
4.	Md. Cabdi Siciid Faahiye	Wasiirka Ciyaaraha iyo Dalxiiska
5.	Md. C/risaaq Cali Cismaan	Wasiirka Dib-udejinta
6.	Md. Maxamed Nuur Caraale Duur	Wasiirka Arrimaha Gudaha
	Md. Maxamed Rashiid	Wasiiru dawlaha Wasaarada Arrimaha Dibada

### B. **Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axxaabta Siyasada:-**

No.	Masuulka	Xilka Masuulka
1.	Md. Maxamed Cabdi Maalik	Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axxaabta Siyasada

2.	Md. Xasan Axmed Ducaale	Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axxaabta Siyasada
3.	Md. Ismaciil C/lahi Cali	Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axxaabta Siyasada
4.	Md. Cumar Xasan Axmed	Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axxaabta Siyasada
5.	Md. Aadan Geedi Qayaad	Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axxaabta Siyasada
6.	Md. Cabdale Ibrahim Maxamed	Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axxaabta Siyasada
7.	Md. C/risaq Jaamac Cumar	Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada iyo Axxaabta Siyasada



**c. Masuuliyiinta Gudidda Cadaalada:-**

No.	Masuulka	Xilka Masuulka
1.	Md. Cabdi Faarax Geedi	Xubin Gudidda Cadaalada
2.	Md. Aadan Jaamac Maxa'ed	Xubin Gudidda Cadaalada

**D. Masuuliyiinta Komishanka Xuquuqan Insaanka:-**

No.	Masuulka	Xilka Masuulka
-----	----------	----------------

1.	Md. Fadxiya xuseen jaabuur	Komishanka Xuquuqan insaanka
2.	Md. Hodan Maxamed Cali	Komishanka Xuquuqan insaanka
3.	Md. Saleeban Warsame Guuled	Komishanka Xuquuqan insaanka
4.	Md. Liibaan Ismaaciil Maxamud	Komishanka Xuquuqan insaanka
5.	Md. Aamina C/lahi Ahmed	Komishanka Xuquuqan insaanka
6.	Md. Maxamud Garaad Maxamed	Komishanka Xuquuqan insaanka
7.	Md. Idiris Xuseen Suldaan	Komishanka Xuquuqan insaanka

## 7. Ansixintii Miisaaniyada Qaranka 2011ka:-

Waxa Golaha Wakiiladu Ansixiyay Odoroska Miisaaniyada Qaranka 2011ka oo Xukuumadu u soo gudbisey waxaana Warbixinta Miisaaniyada Golaha ka hor akhriyay Wasiirka Wasaarada Maaliyada, intaa ka dibna waxay mudanayaashu markay soo akhriyeen Su'aalo ka waydiiyeen Wasiirka, isla markaana Dood dheer ka dib waxaa Goluhu Odoroskaa Miisaaniyada ku ansixiyay cod Aqlabiyad ah.

## 8. Mashaariicdii Sharci ee Goluhu Ansixiyay:-

No	Xeerka	Taariikhda	Halka Loo gudbiyay
1.	Xeerka Kala xadaynta Mushaharoyinka Masuuliyiinta Qaranka Qodobkiisii 10aad	05.02/2011	Madaxweynaha
2.	Xeerka Abaabul ka-saarka Qaranka Xeer Lr.48/2011	04/04/2011	Madaxweynaha
3.	Xeerka Biyaha Qaranka Xeer Lr. 46/2011	21/03/2011	Madaxweynaha
4.	Xeerka Isgaadhsiinta Xeer Lr.50/2011	30/06/2011	Madaxweynaha
5.	Xeerka Anshaxa iyo Nabadgalyada Guud Xeer Lr.51/2011	10/11/2011	Golaha Guurtida
6.	Xeerka Miinada Xeer Lr.41/2011 Madaxweynaha	18/04/2011	Madaxweynaha
7.	Xeerka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada Xeer Lr.14/2011	31/08/2011	Madaxweynaha
8.	W.Ka abista Xeerka Doorashooyinka G.Deegaanka M/tooyada Xeer Lr20/2011	23/11/2011	Madaxweynaha
9.	W. ka badalka iyo Kaabista Xeerka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada	27/11/2011	Madaxweynaha
10.	W. ka badalka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha	20/11/2011	Madaxweynaha

<b>11.</b>	Asixinta \$3 ee Adeega Madaarada	26/03/2011	Madaxweynaha
<b>12.</b>	Ansixinta Soo daabacista Noodhka Nuqulada 100 iyo 5000 ee Lacagta JSL	02/04/2011	Madaxweyanaha

## 9. Mashaariicdii sharci ee Madaxweynuhu sooceliyay:-

Wuxuu Madaxweynuhu dib ugu soo celiyay Golaha Wakiilada Xeerka Biyaha Qaranka oo markii labada Gole (Guurtida iyo Wakiiladu) ansixiyeen u gudbiyeen Madaxweynaha si uu dhaqagaliyo laakiin wuxuu madaxweynuhu sida Dastuurku siinayo uu ka codsaday Golayaasha inay wax ka soo badalaan.

## 10. Mooshinadii Golaha la horkeenay:-

Waxaa sanadkii 2011kii Golaha la horkeenay Mooshino dhowr ah oo kala ahaa:-

1. Mooshinkii Wax Ka-badalka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Golayaasha deegaanka iyo Madaxtooyada
2. Mooshinkii Wax Ka-badalka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangalinta ka dib markii Diiwaangalintii hore la laalay.
3. Mooshinkii Wax Ka-badalka iyo Kaabista Xeerka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada
4. Mooshinkii Xeerka Bangiga Dhexe ee Somaliland

## 11. Mashaariicda Sharci (Xeerar) ay Gudiyadu gacanta ku hayeen:-

No	Magaca Guddiga iyo Xeerarka ay kala hayaan
<b>1.</b>	<b>Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada</b>
.	1) Xeerka Midaynta Cashuuraha 2) Xeerka Caymiska Qaranka 3) Xeerka Law of Establishment of Somaliland Agency 4) Xeerka Baanka Dhexe 5) Xeerka Baananka Islaamiga ah
<b>2.</b>	<b>Guddiga Garsoorka, xuquuqal insaanka iyo Dastuurka</b>
	1) Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud 2) Xubnaha Komishanka Xuquuqda Aadamaha
<b>3.</b>	<b>Guddiga Joogtada iyo Anshaxa</b>
	1) Xeerka Anshaxa Guud Xeerka rka Habka Maamuuska Mudanayaasha
<b>4.</b>	<b>Guddiga Arimaha Bulshada iyo Diinta</b>

	1) Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose 2) Xeerka Saxaafada 3) Xeerka Ciyaaraha
<b>5.</b>	<b>Guddiga Arimaha Gudaha, difaaca Iyo nabadgalyada Guud</b>
	1) Xeerka Caasimada
<b>6.</b>	<b>Guddiga Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah</b>
	1) Xeerka Wadamarista Gaadiidka
<b>7.</b>	<b>Guddiga khayraadka dabiiciga ah, Xoolaha iyo Macdanta</b>
	1) Xeerka Fayadhawrka Hilibka
<b>8,</b>	<b>Gudidda Ilaaalinta Hantida Qaranka iyo Musuqmasuqa</b>
	1. Xeerka La dagaalanka Musuqmaasuqa

## 12. Waxqabadkii Gudiyada Golaha Wakiilada JSL:-

### **Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.**

✚ Gudidda Joogtada iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga ah ee xil-gudashada hawlaha qaran, iyadoo ka duulaysa mihiimada ay leeyihiin hawlaha qaran ee ay u hayaan wasaaradaha dawladu iyo hayadaha madaxbanaani, waxay kulan xog waran la yeelatay wasaaradaha iyo Hayadaha Madaxa Banaan ee kala ah:

1. Wasaaradda Arrimaha Gudaha
2. Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo iskaashiga caalimaga
3. Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sarre
4. Hanti dhawraha Guud ee Qaranka
5. Xisaabiyaha Guud ee Qaranka

Wasaaradaha iyo Hay'addahaas Madaxa banaan ee Gudiddu Masuuliyiintooda u yeedheen waxay wax ka weydiiyeen hawlaha ay qaranka u hayaan, wixii u qabsoomey, waxyaabaha u qorsheysan iyo sidey shuruucda iyo dalka ugu dhaqmaan ama u dhaqangaliyaan.

### **Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Miisaaniyada**

✚ Gudidda Dhaqaalaha iyo Ganacsigu waxay ka soo talo-bixisay Miisaaniyadii Qaranka ee 2011ka, iyagoo kulamo kala yeelatay Wasaarada Maaliyada,



Maareeyaha Dekada Barbera iyo Masuuliyiin kale oo ay Miisaaniyadu Khusaysay si ay wax uga weydiiyaan Miisaaniyada Qaranka.

- ✚ Sidoo kale waxay Gudidu Golaha u soo Gudbiyeen Xeerka Isgaadhsiinta oo Gudidu Gacanta ku haysay iyadoo Golaha soo hordhigtey warbixin koobsaneysa wax ka badalka gudidda ee Xeerka iyo talabixintoodii.

### **Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashiga Caalamiga ah iyo Qorshaynta Qaranka.**

- ✚ Gudiddu waxay Golaha u soo gudbisay Xeerka Wadamarista oo ay gacanta ku haysay, iyadoo u qabatay Xeerka laba Kulan (workshops) oo ay kula qabatay Magaalooyinka Hargiesa iyo Burco, iyadoo Xeerka ka talagalay Daneeyayaashiisa labada gobol ku dhaqan, talooyin badan ka soo ururiyay,
- ✚ Sidoo kale Gudoomiyaha Gudida ayaa Golaha warbixin ka siiyay Waftigii K. Suudaan oo ku weheliyay Madaxweynaha Somaliland Md. Axmed Maxamed **Siilaanyo**, waftigaas oo csuumad ay dalkaas ka heleen kaga qabgalay Xafladii wanqalida dalkaasi ee dawladnimadiisa Madaxbanaani.
- ✚ Sidoo kale intii lagu jiray sanadka 2011 waxay ka soo talabixisay Wasiiru Dawlaha Wasaarada Arrimaha Dibada in loo ansixiyo Xilka loo magacaabay.

### **Gudidda Khayraadka Dibiiciga, Macdanta iyo Xoolaha Nool.**

- Maalintii ay taariikhdu ahayd 13/07/2011. Maalin Arbaca ah waxay guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga kula la yeelatay isuduwaha Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta reer Miiga ah ee Gobolka Sanaag iyadoo laga waraysatay xaalada Deegaanka ee gobolka Sanaag
- Markay taariikhdu ahayd **16/07/2011**. Maalin Sabti ah waxay guddida deegaanka xoolaha iyo khayraadka dabiiciga kulan la yeelatay Agaasimihii hore ee mashruuca Somaliland (Cadastral Survey oo ah Mohamed Warsame (Baag).
- Maalintii ay taariikhdu ahayd **05/07/2011**. Maalin salaasa ah waxay guddida deegaanka xoolaha iyo khayraadka dabiiciga kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta reer Miiga oo ujeedadiisu ahayd Ansixinta Wasiirka Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miiga
- Guddida Deegaanka, Xoolaha iyo Khayraadka Dabiiciga waxay aqoon is waydaarsi ugu socday mudo saddex maalmood ah hoolka guddida joogtada ah July/ 26, 27, 28/2011.

Ujeedada aqoon iswaydaarsigu waxay ahayd:

1. In laga lafo guro xeerka shuruucda macdanta ee ku taariikhaysan 1999
2. In guddidu fakrad cad ka hesho inta ayna golaha hor gayn xeerka.

3. In loo diyaariyo aqoon is waydaarsi wayn oo dhex mara guddida deegaanka xoolaha iyo khayraadka dabiiciga iyo dhamaan daneeyayaasha sharciga oo ay ku jiraan Wasaarada Macdanta iyo Biyaha lana filayo in ay qabato AWEBA Ramadaan ka dib 2011.
- Markay taariikhdu ahayd 24-26 September 2011 guddidu waxa ay qabatay workshop loogu tala galay Xeerka Baadhista iyo Ilaalinta Hilibka oo ka dhacay huteelka Guleed Park iyadoo ujeedadiisu ahayd
    1. In laysku keeno dadka ehelka u ah aqoonta hilibka iyo ka ganacsigiisa (Daneeyayaasha) si loo helo fikiro iyo aragtiyo wanaajinaya tayada xeerkan Hilibka Intaan golaha la hor gayn xeerka in la awoodeeyo daneeyayaasha xeerka
    2. In la abuurto jawi suuro galin kara fikiro fayow oo khuseeya Xeerka Hilibka si ay wax uga taro baahida faydhowr ee Hilibka iyo cida ka shaqaysa.

### **Guddida Arrimaha Bulshada iyo Diinta**

**10/01/2011** ayaa Guddidu waxay la kulantay oo ay cabashadoodiina ka dhegaysatay 89 qof oo kamida shaqaalaha Wasaarada Maaliyada ee ku dhacay imtixaankii qiimaynta ahaa ee hay'ada shaqaalaha ka qaaday.

**15/10/2011** sidoo kale Guddidu waxay kulan la yeelatay oo cabashadoodii qoraal ahna u soo gudbiyey 36 qof oo kamida shaqaalaha Wasaarada Warfaafinta ee aan ka gudbin imtixaankii qiimaynta ahaa ee hay'ada shaqaalaha iyo Wasaarada Warfaafintu ka qaadeen.

**16/01/2011**, waxay Guddida Arrimaha Bulshada iyo Diinta u yeedhay ugu horayn Guddoomiyaha Hay'adda shaqaalaha Muxumed Aw Abdi , Waxayna waxka waydiisay arrimo ku saabsan shaqaalaha dowlada ee cabashooyinku uga yimaadeen guddida kadib markii ay ku dhaceen imtixaankii ay ka qaadeen hayada shaqaalaha iyo masuuliyiinta Wasaarada ay ka tirsanaayeen.

**24. Jan.2011** sidoo kale waxay guddidu Arrimaha Bulshada iyo Diinta kulan la yeelatay wasiirka Wasaarada Maaliyada oo ka mid ah xubnaha Guddida uu Madaxweynuhu dhawaan u xil saaray dibu habaynta shaqaalaha dowlada isla markaana ah Wasiirka Maaliyada ee ay shaqaalaha cabanayaa wasaaradiisa ka tirsan yihiin.

**22/10/2011** Guddiga Arrimaha Bulshadda iyo Diinta waxay qoraalo rasmiya oo ku saabsan sidii ay wax uga qaban lahaayeen, warbixin qaraala uga keeni lahaayeen cabashooyin guddida kasoo gaadhay kooxo ka mid ah shaqaalaha Wasaarada warfaafinta oo ka cabanaayey imtixaan laga qaaday.

Guddiga Arrimaha Bulshadda iyo Diinta iyadoo gudanaysa sharci ee xilgudashada hawlaha qaran, waxay sanadkan gudi ahaan u soo jeediyeen gole wayanaha in loo ansixiyo xilalka uu madaxweynaha JSL usoo magacaabay xubnahan hoos ku xusan:-

1. Axmed abdi xaabsade Wasiirka Wasaarada Warfaafinta
2. Cabdi Siciid faahiye Wasiirka Wasaarada dhalinyarada, ciyaaraha iyo dhaqanka

Guddiga Arrimaha Bulshadda iyo Diinta waxay sanadkan kulamo isdaba jooga oo ay ku lafo gurayso waxka bedelka kaabista xeerka saxaafada ku yeelatay xarunteeda G/W, Sidoo gudida waxay u qabatay dhamaan qaybaha uu khuseeyo xeerkani kulan wada jira ka dhacay hotelka Golden Star, 26-27,jan, 2011. Waxayna xeerkaas usoo gudbisay gudiddu Golewaynaha

### **Guddida Arrimaha Gudaha, Amniga iyo Nabadgalyada**

- ✚ 10/07/2011--waxay wax ka bedel iyo kaabis ay ku samaysay Xeer No 14 kaas oo ay wada tashi kala yeelatay qaybaha bulshada ee kala duwan sida Daneeyayaasha Ururada, xisbiyadii hare u jirey iyo ururada dhalinyarada kulan kaas oo socdey mudo sadex cisho ah kuna qabsoomay AMBASATOR HOTEL halkaasna waxaa kasoo baxay qodobbo aad u mihiim ah oo ay kim ahaayeen in la sameeyo gudida diiwaan-gelinta e maanta jirta dood ka bacdi, waxaana goluhu ansixiyey Xeer no 14 markii ay gudidu usoo gudbisey.



- ✚ 26/07/2011-waxay Gudida Arimaha Gudaha Nabad-gelyada iyo difaacu ay siminaar u qabatay xeerka caasimada kaas oo ku qabsoomay HOTEL GUULEED ee magaalada hargeysa soconaayeyna mudo sadex cisho ah,waxaana kasoo qayb galay qaar kamida xildhibaanada Golaha Wakiilada JSL kulankaas waxaa kasoo baxay in dib loo dhigo xeerka caasimada ilaa laga hirgelinayo xeerka kala xadaynta gobolada iyo degmooyinka.
- ✚ 24/09/2011 waxay gudida arimaha gudaha nabad-gelyada iyo difaacu ay kulan la yeelatay Gudida Diiwaan gelinta Ururada iyo Ansixinta Asxaabta kuwaas oo ka koobnaa 7 xubnood oo kala ahaa.

1. Maxamed Abdi Maalik Axmed
2. Abdale Ibraahim maxamed
3. Cumar Hassan Ahmed
4. Ismaaciil Cabdilaahi Cali
5. Xasan Axmed Ducaale
6. Adam Geedi Qayaad
7. Cabdirisaaq Jaamac Cumar (Ciyaale).

✚ 05/07/2011-waxaa Gudida hor yimi Wasiirka Wasaarada dib-udjinta JSL Md. Cabdirisaaq Cali Cismaan , waxaana gudidu la yeelatay xog waraysi balaadhan oo ku saabsan aqoontiisa iyo waayo aragnimadiisa waxaana wasiirku uu uga jawaabay si waafiya dhamaan su'aalihii ay wydiinayeen xildhibaanadu waxaana kulankaas kasoo baxay in gudidu go'aan ku gaadho in wasiirka loo gudbiyo Gole weynaha halkaasoo lagu ansixiyey wasiirka.

✚ 26 /09/011 Gudidu waxay xog waraysi la yeelatay wasiirka Arimaha Gudaha JSL waraysigaas oo ka dhacay xafiiska Gudida ee xarunta Golaha waxaana kulankaas kasoo baxay kadib markii ay gudidu ku qanacday waaya aragnimadiisa maamul in gudidu ay wasiirka usoo gudbiso Golaha si loo ansixiyo waxaana wasiir Maxamed Nuur Caraale (Duur) uu goluhu ku ansixiyey cod aqlebiyad ah.

✚ 2011 waxaa gudida Arimaha Gudaha Nabad-gelyada iyo difaacu ay golaha horkeentay kadib markii ay aad uga soo shaqaysay hawlo badana kazoo qabatay soona nidaamisey Xeerka nabad gelyada guud kaas oo goluhu ansixiyey kadib markii falaqayn balaadhan laga sameeyey xeerkan waxaa goluhu isku raacay inuu ansixiyo.

### **Gudidda Cadaalda, Xuquuqal Insaanka iyo Dastuurka.**

Gudiddu waxay Golaha u soo gudbisay isla markaana soo xushay laba Xubnood oo Gudidda Cadaalada Qaranka kuwaas oo kala ahaa

1. Md. Cabdi Faarax Geedi
2. Md. Aadan Jaamac Maxa'ed Goluhuna u ansixiyay labada xubnood xilalkaa.

Guddigu iyaga oo fulinaya waajibaadka uu faray Dastuurka Qaranka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada iyaga oo sidoo kale ka duulaya muhiimada in la helo xog-dhab ah oo ku saabsan guud ahaan xabsiyada dalka, waaxda garsoorka iyo saldhigyada, si loo sugo xaalada maxaabiista xidhan garsoor ka ay helaan, xad-gudubyada iyo gabood falada ka dhan ah, waxaa kale oo aanu rabnay in aanu wax ka ogaano nafaqada ay helaan maxaabiista iyo nadaafada xabsiyada maxaabiistu ku xidhan tahayba, Haddaba Guddigu si ay u fuliyaan waajibaadkaas Qaran, waxaa ay qorshaysteen hawlgal ay ku kor-meerayaan dhamaan xabsiyada, saldhigyada iyo waaxda garsoorka ee afarta gobol magaalo madaxyadooda sida Borama, Hargiesa, Berbera, Burco iyo xabsiga wayn ee Mandheera.

Si taas loo gaadho gudiga waxaa hagayey hawlgalkoodaas su'aalo aanu diyaarsanay (Questioner) oo aanu si siman u waydiinaynay masuuliyiinta xabsiyada, waaxda garsoorka iyo saldhigyada booliska ee goboladaas aan sare ku sheegnay, sida ku cadayd su'aalahaas aanu diyaarsanay waxa u kala astaysnaayeen Xabsiyada, saldhigyada Booliska, Xeer-ilaalinta iyo Maxkamaha.

### **Gudida ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranka:-**

Gudidan oo golaha u qaabilsan ilaalinta, daryeelka iyo kormeerka guud ahaan hantida qaranka maguurto iyo guurtaba.

Gudida ayaa waxay 3dii bilood ee sanadkan 2011 ugu danbeeyey waxay qabteen kulano iyo hawlqabado dhawra oo ay ku sugayeen ama ku xoojinayen habsami u isticmaalka miisaaniyada qaranka iyo ka hortaga musuq maasuqa.

- 1) Gudidu waxay Naaqishtay, ka dooday oo falanqaysay xisaab-xidhkii miisaaniyada 2010 ee dawlada, oo uu soo gudbiyey Hanti dhawraha guud, waxaanay gudidu dib ugu celisay wasiirka maaliyada xisaab-xidhkaas ka dib markay arkeen xisaabo badan oo aanay cadayn habkii loo qarash gareeyey isla markaana qaar ka mida haayadaha xukuumadu cadeeyeen in aanay war u hayn xisaabaadkaas.

Waxaanay gudidu la yeelatay kulamo Wasiirka maaliyada iyo Hanti dhawraha guud isla markaana waxay la tashi la samaysay gudoomiyaha golaha wakiilada.

Waxaana wasiirka Maaliyada loo gudbiyey inuu sida ugu haboon u soo gudbiyo xisaab xidhadii sanadii 2007, 2008, 2009 iyo 2010 kaba. Isla markiibana waxa uu wasiirka maaliyadu soo gudbiyey buuga xisaabxidhka 2010 oo lagu sameeyey wax ka bedel.

- 2) gudidu waxay kale oo kulamo la yeelatay waaxda maamulka lacagta dawlada ee (Public Finance Management Reform) PFM waxaanay gudida u soo bandhigeen mashaariic baanka aduunku ugu talo galay Somaliland oo 18 milyan oo dolar ah, isla markaana waxay u soo gudbiyeen 5 xeer oo aan la'aantood dhaqaalahaas Baanka aduunku soo daynayn kuna xidhan tahay ansixita xeerarkan oo kala ah sidan:

- **The public finance management and accountability act**
- **The Revenue act**
- **The custom act**
- **The national audit act**
- **The public procurement act**

Xeerarkan oo dhamaan ku qoran afka ingiriisida ayaa waxay hada yaalaan xafiiska gudida daryeelka iyo ilaalinta hantida qaranka.

5 tan xeer ayaa waxay inaga caawinaysaa hababka aynu u maamulayno dhaqaalaha oo ah hab waadixa oo cad (Transparent) isla markaana sahlaya habka xisaabcelinta iyo isticmaalida ee mashruuca.

- 3) Gudidu waxay kale oo ka qayb gashay Xuskii maalinta la dagaalanka musuq maasuqa 2011 oo sanadan ay halkudhig u ahayd (MAANTA AAN KA BILAWNEE MUSUQMAASUQA DIIDA).

### **13. Safaradii Dibada ee 2011kii:-**

**Safarkii labada Gole ee Botswana:-** Labada Gudoomiye ku-xigeenada 2aad ee (Guurtida iyo Wakiilada) , 6 Mudane iyo Labada Xoghayayaasha Guud ( Guurtida iyo Wakiilada), waxay safar mudo todobaad ah qaatay ku tageen Dalka Botswana oo la kulmeen Dhigooda Barlamaanka Dalkaas safarkan oo Suurtagalisyay Hay'ada AWEPA iyadoo ay ka soo korodhsadeen sida labada aqal ee barlamaan u shaqeeyo iyo qaabdhismeedka shaqo, sidoo kale waxay xidhiidh fiican ka dhex abuurtay Baarlamaanka Somaliland iyo Botswana.

**Gudidda Arrimaha Dibada:-** Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Dibada wuxuu safarkii uu ku wehelinayay Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland **Md. Axmed Maxamed Siilaanyo** ay Koonfurta Suudaan ku casuuntay Xaflada Wanqalideedii Dalka ka dib markii afti loo qaaday dadka ku nool inay ka go'aan dalkaasi ay sidaas ku dalbadeen, safarkan oo Madaxweynaha ay ku wehelinayeen Wasiiro, Masuuliyiin kale iyo Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Dibada **Md. Xuseen Maxamed Cige**, wuxuu warbixin Kooban oo safarkaas ku saabsan ka siiyay Golaha.

**Safarkii Munayaasha ee Gobolada dalka:-** (Constituency outreaching), Mudanayaasha Golaha Wakiiladu waxay safar ugu kala baxeen Degmooyinkii laga soo kala doortay iyadoo booqashooyin ku tageen Gobolada Barbera, Gabiley Boorame.

### **14. Aqoon Korodhsiyo:-**

- **AWEPA:** - waxay tababar aqoon korodhsi u samaysay Gudidda Joogtada ah laba jeer, aqoon korodhsigan oo Gudidda siinayay Mudane ka tirsan Barlamaanka Dalka Kenya Mr. **Ooloo Oringo**, waxa aqoon korodhsi ka siiyay siday u shaqayso Gudida Joogtada ah ee iyo Awooda iyo Waajibaadka Guud ee Gudidu Golaha wakiil uga tahay.
- **Gudiyada:-** Gudidda Arrimaha Dibadu waxay laba workshop u qabatay Xeerka Wadamarista oo Gudidaasi Gacanta ku haysay laba workshop oo ka kala dhacay

Magaalooyinka Hargiesa iyo Burco, waxaa ka soo qaybgalay daneeyayaasha Xeerka iyagoo fikradahooda ka dhiibtay.

- Gudidda Khayraadka Dabiiciga oo Gacanta k u haysan Xeerka Fayadhawrka ayaa laba workshop u qabatay, mid ay ka soo qayb.

## **15. Wufuudihii Golaha yimi 2011kii:-**

- ✚ **6/July/2011** waxaa Golaha Wakiiladu ay fadhi ku qaabileen Wafti balaadhan oo ka socday Midawga Europe iyo qaadhaan bixiyayaasha oo uu Gudoominayay Agaasime **ANDRIS PIEBALGS**, iyadoo fadhigaa uu Director Piebalgs ka jeediyay warbixin nuxurkeedu dhinacyo badan taabanayay waxyaabaha uu sida qotoda dheer uga hadlay waxaa ka mid ahaa Arimaha qarameedka iyo goboleedka, arimaha maamulka, iyo tusaalooyin xagga Dhaqaalaha.



Waxaa kale oo uu ka hadlay xasilonida iyo dimuquraadiyada ka hana qaaday jamhuuriyadda Somaliland oo uu yidhi waa mid aragtida caalamka aad u soo jiidatay ahna mid aad idhaha loogu hayo, waxaana tusaale cad u ah doorashooyinka oo aan ka dhicin wadamo badan oo afrikaan ah run ahaatiina aad iyo aad loola dhacay hanaan ka ay u dhacday iyo sida la isugu wareejiyay Madaxweynenimadii si dimuqraadi ah.



Ugudan bayntii waxaa uu mahadnaqay soo dhaweyntii diiranayn waxaanu sheegay in ay sii wadi doonaan dadaalada ay ka wada shaqaynayaan si loo balaadhiyo horumarka Somaliland ee ***Dhaqaale, Bulsho, Siyaasadeed iyo mid Dimuqraadiyadeedba.***

- ✚ Intii lagu jirey sanadkii 2011ka Golaha Wakiiladu wuxuu la kulmay wafti sare oo ka socdey dalka Britain oo uu hogaaminayay wasiirka Dalka Britain u qaabilsan Afrika, wasiirkaas oo warbixin kooban oo safarkiisa ku saabsan golaha siiyay fadhi ku siiyay ayaa ka hadlay xidhiidhka labada dal, qaadhaanada dalkaasi ugu talagalay Somaliland iyo iskaashiga labada dhinac ee aminga mandaqada guud ahaan.



## Appendex

### Liiska Magacyada Mudanayaasha Golaha Wakiilada:-

No.	Magaca	Gobolka	Xisbiga
1.	Abuubakar C/raxmaan Good	Awdal	Kulmiye
2.	Ikraan Xaaji Daaud Warsame	Awdal	Kulmiye
3.	Mahdi Xuseen Cadare	Awdal	Kulmiye
4.	Axmed Cabdi Siciid Muuse	Awdal	UCID
5.	Mahdi Cabdilaahi Maxamuud	Awdal	UCID
6.	Muuse Maxamed Ismaaciil Waabari	Awdal	UCID
7.	Axmed Maxamed Maxamuud (Afweyne)	Awdal	UDUB
8.	Axmeed Barkhad Obsiye	Awdal	UDUB
9.	Cabdi Maxamuud Jaamac Gaagaale	Awdal	UDUB
10.	Cali Sheekh Ibraahin Araye	Awdal	UDUB
11.	Mahdi Xaaji Xasan Sugaal	Awdal	UDUB
12.	Maxamed Barkad Miigane	Awdal	UDUB
13.	Maxamed Yaasiin Sheekh Cali Ayaanle	Awdal	UDUB
14.	Axmed Cabdi Nur Kijaandhe	Hargeisa	Kulmiye
15.	Axmed Ibraahin Daahir Axmed (Ax. weyne)	Hargeisa	Kulmiye
16.	Axmed Maxamed Diiriye NacNac -	Hargeisa	Kulmiye
17.	Cabdicasiis Maxamed Samaale Ducaale -	Hargeisa	Kulmiye
18.	Cali Yuusuf Axmed Jaamac	Hargeisa	Kulmiye
19.	Ibraahin Axmed- Haybe	Hargeisa	Kulmiye
20.	Maxamed X Maxamuud Cumar- Xaashi	Hargeisa	Kulmiye
21.	Maxamuud Axmed Obsiye	Hargeisa	Kulmiye
22.	Bashir Sheekh Xuseen Tukaale	Hargeisa	UCID
23.	Cabdiraxmaan Cismaan Caalin	Hargeisa	UCID
24.	Ibraahin Mahdi Buubaa	Hargeisa	UCID
25.	Khadar Aadan Xuseen	Hargeisa	UCID
26.	Maxamed Baaruud Shide	Hargeisa	UCID
27.	Xaashi Xuseen Caabi	Hargeisa	UCID
28.	Aadan Muxumed Hoorri (Mataan)	Hargeisa	UDUB
29.	C/kariim Aw- Cali Shabeel	Hargeisa	UDUB
30.	C/qaadir XIsmaaciil Jirde	Hargeisa	UDUB
31.	Cabdiraxmaan Maxamed Jaamac	Hargeisa	UDUB
32.	Cali Obsiye Diiriye (Cali Gabiley)	Hargeisa	UDUB
33.	Xasan Cawaale Caynaan	Hargeisa	UDUB
34.	Maxamed Xuseen X Ciisse	Saaxil	Kulmiye
35.	Siciid Cilmi Rooble	Saaxil	Kulmiye
36.	Axmed Maxamed Cali (Beegsi)	Saaxil	UCID
37.	Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillahi (Cirro)	Saaxil	UCID
38.	Faarax Maxamuud Cabdulle	Saaxil	UCID
39.	Maxamed Faarax Qabiile	Saaxil	UCID
40.	Aadan Xaaji Diiriye Dirir	Saaxil	UDUB
41.	Axmed Xasan Aadan Waysocadde	Saaxil	UDUB

42.	Maxamed Nuur Carraale	Saaxil	UDUB
43.	Maxamuud Jaamac Xaaji Cilmi (Dable)	Saaxil	UDUB
44.	Cabdiraxmaan Yuusuf Cali Cartan	Sanaag	Kulmiye
45.	Cali Maxamed Aadan Cali Barre	Sanaag	Kulmiye
46.	Ibraahim Jaamac Cali Maxamed Reyte	Sanaag	Kulmiye
47.	Maxamed Cismaan Maxamed Bulqaas	Sanaag	Kulmiye
48.	C/raxman Maxamed Talyanle	Sanaag	Kulmiye
49.	Maxamed Cali Jibriil	Sanaag	UCID
50.	Saleebaan Cawad Cali	Sanaag	UCID
51.	Baar Siciid Faarax	Sanaag	UDUB
52.	Cabdiqaadir Jaamac Xaamud	Sanaag	UDUB
53.	Ibraahin Carraale Cabdi (Ruush)	Sanaag	UDUB
54.	Ibraahin Maxamed Xuseen (Dhaadheere)	Sanaag	UDUB
55.	Maxamed Saalax Cige	Sanaag	UDUB
56.	Axmed Ducaale Bullaale	Sool	Kulmiye
57.	Baashe Maxamed Cabdi	Sool	Kulmiye
58.	Ibraahin Axmed Reygal	Sool	Kulmiye
59.	Maxamed Jaamac Cabdi	Sool	Kulmiye
60.	Cabdiqaadir Askar Xasan	Sool	UCID
61.	Siciid Maxamed Cilmi	Sool	UCID
62.	Aadan Tarabi Oogle	Sool	UDUB
63.	Cabdiraxmaan Muuse	Sool	UDUB
64.	Maxamed Axmed Maxamud (Dhakool)	Sool	UDUB
65.	Maxamuud Dhunkaal Gutaale	Sool	UDUB
66.	Saleebaan Yuusuf Cali Koore	Sool	UDUB
67.	Xariir Siciid Bullaale	Sool	UDUB
68.	Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne)	Tog-dheer	Kulmiye
69.	Maxamed Cumar Aadan	Tog-dheer	Kulmiye
70.	Maxamed Cali Xirsi	Tog-dheer	Kulmiye
71.	Maxamed X Yuusuf Axmed (Waabeeyo)	Tog-dheer	Kulmiye
72.	Xamse Maxamed Gaadaweyne	Tog-dheer	Kulmiye
73.	Cali Xasan Maxamed (Cali-mareexaan)	Tog-dheer	Kulmiye
74.	Jaamac Xasan Aadan	Tog-dheer	UCID
75.	Maxamed Jaamac Cali	Tog-dheer	UCID
76.	Naasir Xaaji Cali Shire	Tog-dheer	UCID
77.	Xuseen Maxamed Cigeh	Tog-dheer	UCID
78.	Axmed Maxamed Nuur Maxamed	Tog-dheer	UDUB
79.	C/casiis Ismaaciil Ducaale	Tog-dheer	UDUB
80.	Cali Xaaji Maxamed Muuse	Tog-dheer	UDUB
81.	Farxaan Maxamed Cali	Tog-dheer	UDUB
82.	Xuseen Ismaaciil Yuusuf	Tog-dheer	UDUB

**Magacyada Masuliyiinta iyo xubnaha Warbixinta ku jira:-**

**Magaca Masuulka**

**Xilka Masuulka**

**Md. Axmed Maxamed Maxamud (Siilaanyo)**

Md. Saleebaan Maxamuud Aadam  
 Md. C/raxman Maxamed Cabdilaahi (Cirro)  
 Md. C/casiis Maxamed Samaale  
 Md. Maxamed Xirsi Oomane  
 Md. Yuusuf Ismaciil Cali  
 Mr. Andres Piebalgs  
 Md. Axmed Cabdi Xaabasade  
 Md. Maxamed Siciid Gacamay  
 Md. Xirsi Cali X.Xasan  
 Md. Cabdi Siciid Faahiye  
 Md. C/risaaq Cali Cismaan  
 Md. Maxamed Nuur Caraale Duur  
 Md. Maxamed Rashiid  
 Md. Maxamed Cabdi Maalik  
 Md. Xasan Axmed Ducaale  
 Md. Ismaciil C/lahi Cali  
 Md. Cumar Xasan Axmed  
 Md. Aadan Geedi Qayaad  
 Md. Cabdale Ibrahim Maxamed  
 Md. C/risaaq Jaamac Cumar  
 Md. Cabdi Faarax Geedi  
 Md. Aadan Jaamac Maxa'ed  
 Md. Fadxiya xuseen jaabuur  
 Md. Hodan Maxamed Cali  
 Md. Saleeban Warsame Guuled  
 Md. Liibaan Ismaaciil Maxamud  
 Md. Aamina C/lahi Ahmed  
 Md. Maxamud Garaad Maxamed  
 Md. Idiris Xuseen Suldaan  
 Md. Maxamed Xaashi Cilmi  
 Mr. Maxamed Warsame (Baag)  
 Mr. Muxumed Aw Cabdi

**Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland**

Gudoomiyaha Golaha Guurtida  
 Gudoomiyaha Golaha Wakiilada  
 Gudomiye ku-xigenka 1<sup>aad</sup> Golaha Wakiilada  
 Gudoomiyihii hore ee Maxkamada Sare  
 Gudoomiyihii hore ee Maxkamada Sare  
 Director Of EU delegate visited Somaliland  
 Wasiirka Warfaafinta iyo Wacyigalinta  
 Wasiirka Deegaanka iyo H/Reer miyiga  
 Wasiirka Madaxtooyada  
 Wasiirka Ciyaaraha iyo Dalxiiska  
 Wasiirka Dib-udejinta  
 Wasiirka Arrimaha Gudaha  
 Wasiiru dawlaha W. Arrimaha Dibada  
 Xubin G. Diwangalinta Ur/Axsabta Siyasada  
 Xubin G. Diwangalinta Ur/Axsabta Siyasada  
 Xubin G. Diwangalinta Ur/Axsabta Siyasada  
 Xubin G. Diwangalinta Ur/Axsabta Siyasada  
 Xubin G. Diwangalinta Ur/Axsabta Siyasada  
 Xubin G. Diwangalinta Ur/Axsabta Siyasada  
 Xubin G. Diwangalinta Ur/Axsabta Siyasada  
 Xubin Gudidda Cadaalada  
 Xubin Gudidda Cadaalada  
 Komishanka Xuquuqan insaanka  
 Komishanka Xuquuqan insaanka  
 Komishanka Xuquuqan insaanka  
 Komishanka Xuquuqan insaanka  
 Komishanka Xuquuqan insaanka  
 Komishanka Xuquuqan insaanka  
 Komishanka Xuquuqan insaanka  
 Komishanka Xuquuqan insaanka  
 Wasiirka Wasaarada Maaliyada  
 Agaasimaha Mashruuca Cadastral Survey  
 Agaasimaha Hay'addaha Shaqaalaha

**Liiska Shaqaalaha Golaha Wakiilada:-****No. Magacayda**

1. Abdirisaksa'eedayanle
2. Jamal Jama Hassan
3. Abdi IsmcilXawadle
4. Ahmed Ali Kahin
5. Awad Ali Mohamed
6. Mahamuud Sulamen Omer
7. Mustafe Mohamed Dahir
8. Abdinasir Osman Mahamoud
9. Hibo Mohamed Ibrahim
10. Ismahan Yusuf Ibrahim
11. Ahmed Mohamed Eige
12. Sulieman Abdisitar Dubad
13. Huda Mohamed Ahmed

**Shaqada.**

- Xoghayaha Guud  
 Xoghaye ku-xigeenka  
 Ag. Waaxda Maamulka iyo Xisabadka  
 La-taliye Sharci  
 Ag. Waaxda H/qoraalka iyo Gudiyada  
 Ag. Waaxda ICT  
 La-taliye Sharci  
 Ag. Waaxda Qorsheynta  
 Ag. Waaxda Xusuus dhowrka  
 Ag. Waaxda Shaqaalaha  
 Xog. Gudidda Arrimaha Bulshada  
 Xog. Gudidda Ilaalinta Hantida  
 Xogheynta Xoghayaha Guud

14.	Hamse Mohamed H. Muse	Head of Logistics
15.	Farah Ibrahim Gamute	Xisaabaadka
16.	Sahal Guuleed Xadi	Xogheynta Gudidda Dhaqaalaha
17.	Asiya Rashiid Egge	Xusuus dhowrka
18.	Aydarus Egeh Khayre	Daabacaada
19.	Ali Axmed Ibrahim	Hadal-qoraalka
20.	Ayanle Ahmed Abdi	Xog. Gudidda Joogtada
21.	Yusuf Habib Husein	Xog. Gudida Kh/dabiciga iyo Deganka
22.	Mubarig Farah Warsame	Xog. Gudidda Arrimaha Gudaha
23.	Faysal Ibrahim Cise	Xog. Gudidda Arrimaha Dlbada
24.	Abdillahi Abdi Adan	Xog. Gudidda Cadaalada iyo X/insanka
25.	Mohamed Sa'eed Husein	Xisaabaadka
26.	Abdirahman Aydiid Abokor	ICT technical

***C/risaaq Siciid Ayaanle***

**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.**

---

Filename: 2011 Yearly Report  
Directory: C:\Users\CAWAD\Documents  
Template: C:\Users\CAWAD\AppData\Roaming\Microsoft\Templates\Normal.  
dotm  
Title:  
Subject:  
Author: User  
Keywords:  
Comments:  
Creation Date: 17/08/2016 16:09:00  
Change Number: 58  
Last Saved On: 06/03/2017 21:46:00  
Last Saved By: CAWAD  
Total Editing Time: 185 Minutes  
Last Printed On: 06/03/2017 21:47:00  
As of Last Complete Printing  
Number of Pages: 20  
Number of Words: 4,808 (approx.)  
Number of Characters: 27,406 (approx.)